

# Alberta ayaa mas'uul ka ah mustaqbalkeeda.

Oktoober 30, 2023 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Qorshooyin ah in lacag badan jeebka reer Alberta lagu hayo, hagaajinta natiiyooyinka bukaanka iyo taageeridda arday badan ayaa weli ah mudnaanta dawladda Alberta, sida lagu qeexay hadaljeedinta carshiga.

Khudbada, ayaa golaha laga akhriyay Okt. 30da in la furo kala fadhiga koowaad ee 31-aad ee sharci-dejinta, wuxuuna qeexayaa canshuur dhimista qofka ugu horreeya dakhligiisu yahay \$60,000, sharciga hor istaagaya canshuur kordhin iyada oo aan la helin heshiis cod-bixiye, tillaabooyin lagu xaddidayo kharashka caymiska, korontada iyo shidaalka, kordhinta daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha waxbarashada, iyo awood u helida ah in la helo guryo la awoodi karo.

"Waan ku faraxsanahay kalfadhigan sharci dejinta ee soo socda iyo afarta sano ee soo socota. Guga, dadka reer Alberta waxay na siiyeen amar ah inaan wax ka qabanno arrimahooda ugu muhiimsan. Waxaa naga go'an inaan ka dhabeyno balamahayagii, shaqaduna waxay si dhab ah u bilaabantay, maanta."

*Danielle Smith, Gudoomiyaha*

"Gobolkeenu wuxuu isku arkay marxalad xasaasi ah oo taariikhdeena ah, doorashooyinka la sameeyo bilaha iyo sanadaha soo socda waxay yeelan doonaan saameyn jiil."

*Uqaabilsanaha Boqorka ee Alberta (Lt.-Gov.) Salma Lakhani*

Khudbada carshiga ayaa soo bandhigtay ajandayaasha xukuumadda la doortay bishii June, oo ay ku jirto in la xaqiijiyo in sharciga 1aad uu noqon doono sharci mamnuucaya kordhinta canshuuraha iyada oo aan marka horaba afti loo qaadin. Waxyaabaha ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:

## Xuquuqda gobolka

Alberta waxay sii wadi doontaa la dagaalanka faragelinta federaalka ee xuquuqda gobolka si ay u horumariso saliideeda iyo gaaska ee ka faa'iidada dhaqaale ee gobolka iyo qaranka. Haddii loo baahdo, gobolku wuxuu adeegsan doonaa mooshinnada hoos yimaada Qaranimada gudaha Xeerka Kanada si loo joojiyo falalka aan waafaqsanayn dastuurka oo dhaawacaya Alberta.

## **Cadaadiska koritaanka**

Saadaasha Alberta waxay sare u qaadi doontaa shan milyan oo qof marka la gaaro 2026, dowladdu waxay ballan-qaadday inay dhiseyso waddooyinka, iskuullada iyo goobaha kale ee lagama maarmaanka u ah in lagu taageero dadweyne badan.

## **Awood u helid**

Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa shaqadeeda si ay wax uga qabato caqabadaha hortaagan awoodi u helidda ee gobolka iyadoo yareyneysa culeyska canshuurta saarsan dadka reer Alberta waxayna diiradda saari doontaa dadaallada lagu dhimayo kharashyada dadka reer Alberta ee la xiriira guryaha, shidaalka, korontada iyo caymiska.

## **Badbaadada dadweynaha**

Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa shaqadeeda si ay uga caawiso in dadka reer Alberta ay nabad ku helaan waddooyinka iyo bulshada dhexdeeda. Tan waxaa ka mid ah taageeridda shaqaaleysiinta askar badan oo booliis ah iyo soo bandhigida dib-u-habaynta nidaamka cadaaladda. Intaa waxaa dheer, dawladda Alberta waxay sii wadi doontaa shaqadeeda si ay u caawiso kuwa la halgamaya cudurka qabatinka iyo arrimaha caafimaadka dhimirka ee aan la daweyn, oo ay ku jiraan samaynta bulshooyinka soo kabashada iyo soo bandhigida barnaamijka faragelinta naxariista leh ee kuwa aan awoodin inay sameeyaan go'aamo naf badbaadin ah iyo kuwa khatarta u ah naftooda ama kuwa kale.

## **Daryeelka caafimaadka**

Dowladda Alberta waxay keeni doontaa qorshe lagu baahinayo go'aan gaarista nidaamka daryeelka caafimaadka si loo hubiyo in adeegyada ay heli karaan dadka reer Alberta halka iyo marka ay u baahan yihiin iyo si loo hagaajiyo natiijooyinka bukaanada.

## **Waxbarashada**

Xoojinta nidaamka waxbarashada Alberta waxay ka caawin doontaa gobolka inuu u diyaargarooobo kobaca dadweynaha taasna waxaa lagu gaari doonaa kordhinta tirada fasallada, shaqaalaha iyo doorashooyinka waxbarashada. Intaa waxaa dheer, taageero dheeraad ah oo caafimaadka dhimirka ah iyo xoojinta waxbarashada shaqada ayaa ka caawin doonta ardayda inay guuleystaan oo si wanaagsan ugu diyaar garoobaan mustaqbalka.

## Kala duwanaanshaha dhaqaalaha

Kobcinta dhaqaalaha gobolka ayaa sii ahaan doonta mudnaanta dowladda Alberta. Marka laga soo tago sii kordhinta tamarta iyo qaybaha beeraha ee gobolka, dawladdu waxay sii wadi doontaa dadaalkeeda ku aaddan soo jiidashada maalgashiga iyo taageeridda warshadaha cusub iyo kuwa soo baxaya, oo ay ku jiraan hydrogen, macdanta dhulka dhifka ah, tignoolajiyada, kaymaha, dalxiiska iyo dhaqanka. Iyadoo la sii wado la-shaqaynta bulshooyinka asaliga ah oo meesha ka saaraya caqabadaha dadka ku cusub Alberta si ay u shaqeeyaan, dawladda Alberta waxay hubin doontaa in qof kastaa uu ka qayb qaadan karo guusha gobolka.

## Xogta la xiriirta

- Qobodabada hadaljeedinta Carshiga ([Throne speech highlights](#))
- Hadaljeedinta Carshiga ee 2023 ([Throne Speech 2023](#))

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo Hadaljeedinta Carshiga ([Watch the throne speech](#))

## Weydiimaha warbaahinta

**[Sam Blackett](#)**

780-427-2251

Xoghayaha Warbaahinta